Qalalaashaa Qoyska iyo Sharciga Qoyska ee Australia

.

Waa maxay sharciga qoyska ee Australia ?

Waa maxay qalalaasaha qoysku?

Waa maxay amark kala dhexgalka qalalaasaha qoysku?

Maxaa ku dhacaya carruurta kala taga iyo furiinka ka dib?

Xaggee baad caawimaad ka helaysaa.

[Somali]

Macluumaadka jaaliyadaha dhawaan yimid ee City of Yarra.

FITZROY LEGAL SERVICE INC.

Ilahan macluumaadka waa sameeyey Fitzroy Legal Service iyadoo ay taageerayso Barnaamijka Maalgelinta Bulshada ee Bennelong Foundation iyo City of Yarra.

Mashruucan wuxuu ku suurtagalay hogaaminta iyo natiijo celinta aan wax lagu qiimeeyaa jirin ee Guddiga Hogaaminta ee ka koobnaa xubnaha ka socday Australian Multicultural Foundation, Neighbourhood Justice Centre, InTouch, New Hope Foundation, Women's Health in the North, coHealth, Brotherhood of St Laurence, Victoria Police, Men's Referral Service iyo City of Yarra. Waxaa sidoo kale na taageeray la tashiga bulshada ee Ecumenical Migration Centre, Carringbush iyo coHealth.

This booklet is legal information only, and is not intended as legal advice. Please see a lawyer at a community legal centre if you need advice about a specific issue. The information in this booklet was correct as of date of publish: 21 August 2017.

Bogga Tusmada

BOGGA TUSMADA 3

SHARCIGA QOYSKA 5

WAA MAXAY SHARCIGA QOYSKU? 5
WAA MAXAY GUURGU SHARCIGA AUSTRALIA ? 5
Da'da 5
Xaasaska badan 5
Guurka aan sharciga ahayn 6
XIRIIRKA BURBURAY 6
Kala taga 6
Furiin 7
MAXKAMADAHA SHARCIGA QOYSKA 7
DHEXDHEXAADINTA 8

QALALAASAHA QOYSKA 9

WAA MAXAY QALALAASAHA QOYSKU? 9
YUU SAAMEYEY QALALAASAHA QOYSKU? 10
FALALKEE BAA AH QALALAASE QOYS? 11
QALALAASAHA QOYSKA IYO WAKIILNIMADA/FIISAHA SAYGA 14
BOOLIISKA 15

AMARADA QALALAASAHA QOYSKA 17

WAA MAXAY 'AMARKU?' 17
Ogeysiiska ammaanka qalalaasaha qoyska 17
Ammarka kala dhexgalka ku meel gaarka ah 17
Ammarka kala dhexgalka 18
JEBINTA AMMARKA KALA DHEXGALKA 19

KA WARAN CARRUURTEYDA? 22

YAA ILMO AH? 22
XAGGEE BAY CARRUURTU KU NOOLAAN KARAAN KALA MAQNAANTA AMA FURIINKA KA DIB? 22
YAA GO'AAMINAYA MEESHA CARRUURTU AY KU NOOLAANAYAAN KA DIB KALA MAQNAANTA AMA FURIINKA? 23

XIRIIRADA CAAWIMAADA BADAN 26

MAXKAMADAHA QOYSKA 26
DHEXDHEXAADINTA 26

XIRIIRADA DADKA ISTICMAALA QALALAASAHA QOYSKA 27

XIRIIRADA DHIBANAHA/ KA SAMATA BAXAHA 28

SI AAD U DALBATO AMARKA KALA DHEXGALKA 29

Online 29

At the Neighbourhood Justice Centre Magistrates' Court 29

Saldhiga booliiska xaafadaada 29

Sharciga Qoyska

Waa maxay sharciga qoysku?

Sharciga qoysku waa eray loo isticmaalo in lagu sharxo sharciyada ku saabsan xiriirada qoyska.

Sharciga qoyska waxaa ka mid ah sharciyada ku saabsan guurka, kala taga, furiinka, hantida u dhaxeysa xubnaha qoyska iyo xannaanada carruurta (yey carruutu la noolaan doonaan ka dib marka xiriirku burburo).

Qof waliba wuxuu xaq u leeyahay inuu caawimaad ka helo garyaqaan haddii ay heysato dhibaato sharci oo qoys. Xarumaha sharciga ee bulshada ayaa siin kara tallo sharci oo bilaash ah iyo metelaad ay awoodi karaan ama bilaash ah.

Waa maxay guurgu sharciga Australia ?

Guurgu Australia waa midowga u dhaxeeya nin iyo naag oo laga saarayo dhammaan kuwa kale.

Da'da

Qof si uu u guursado, waa inay jiraan 18 sanno ama ka weyn yihiin. Qofka jira da'da 16 waxaa laga yaabaa in loo ogolaado inuu guursado xaalado laga soo reebayo, ka dib marka maxkamad laga dalbado.

Xaasaska badan

Australia gudaheeda, qofka xaaska leh looma ogola inuu mar labaad guursado.

Guurka aan sharciga ahayn

Australia gudaheeda, uma baahnid inaad guursato si sharci ahaan laguugu aqoonsado lammaane.

Eraga *de facto* wuxuu sharxayaa lammaane leh xiriir guur oo kale, laakiinse aan sharci ahaan isqabin. Tani aad ayey ugu tahay caam Australia waxaana ka mid ah lammaanaha isku jinsiga (nin iyo nin, naag iyo naag).

Xiriirka burburay

Kala taga

Kala tagu waa marka hal qof ama labada qof ee xiriirka leh aysan dooneynin inay lammaane sii ahaadaan.

Australia gudaheeda, waxay noqon kartaa doorashada hal qof oo xiriirkan ku jira inuu tago. Saygu ma aha inuu ogolaado.

Ma jiro nidaam sharci toos ah oo lagu kala tago. Si loo kala tago, mid (ama labadaba)xubnood ee xiriirka ayaa u sheegaya ka kale inaysan dooneynin inay xiriirkan ku sii wada jiraan.

Lammaanuhu waa kala tegi karaa laakiinse weli waxay ku noolaan karaan isku guri.

Furiin

Furiinku waa amarka sharciga ah ee dhammeeya guurka. Waxaa la ogolaan karaa furiinka haddii:

- lammaanuhu ay kala maqnaayeen 12 bilood iyo
- ay tusi karaan in xiriirkoodii uu burburay (inaysan isla sii joogi karin intaa wax ka badan).

Sharcigu **uma** baahna in qof xiriirka ku jira uu sameeyo wax khaldan.

Muwaadiniinta Australia iyo degenayaasha wakhti dheer ayaa ka dalban kara Maxkamadaha Sharciga Qoyska.

Wixii macluumaad dheeraad ah, waxaad la xiriiri kartaa xarunta sharciga bulshada ee xaafadaada, Victoria Legal Aid ama website –yada Maxkamadaha Sharciga Qoyska (eeg qaybta Xiriirada caawimaada badan).

Maxkamadaha Sharciga Qoyska

Marmarka qaarkood, haddii waalidku aysan ku heshiin karin meeshii ay carruurtu ku noolaan lahaayeen ama cidda guriga heynaysa ka dib marka xiriirku burburo , waxaa laga yaabaa inay maxkamad ku danbeeyaan.

Haddii ay tani dhacdo, waa muhiim inaad la xiriirto xarunta sharciga bulshada ama Victoria Legal Aid si aad caawimad u hesho.

Waxaa jira laba maxkamadood Victoria oo dhageysta arimaha sharciga qoyska:

Maxkamda Dariiqada Dawlada Dhexe	Maxkamada go'aamisa badiba dhibaatooyinka sharciga qoyska
Maxkamada Qoyska	Maxkamada go'aamisa dhibaatooyinka adag ee sharciga qoyska.

Dhexdhexaadinta

Dhexdhexaadinta qoyska waa marka lammaanaha kala maqan ee aan isku raaci karin waxa dhici doona intay kala maqan yihiin ama ay isfureen laysu keeno si ay u wada hadlaan oo ay heshiis ku gaaraan. Dhexdhexaadiye aqoon leh oo ka socda Xalinta Muranka Qoyska ayaa kulanka qabta.

Dhexdhexaadiyuhu wuxuu dhageysan doonaa laba dhinacba wuxuuna iskudeyi doonaa inuu ka caawiyo lammaanaha inay gaaraan heshiis u shaqeeya cid kasta oo ku lug leh.

Dhexdhexaaidnta waxay ka caawin kartaa inay dhibaatooyinka xaliso intaysan maxkamad tegin. Tan ayaa u noqon karta dadka fursad uga sahlan oo uga raqiisan dadka qaba dhibaatooyinka sharciga qoyska.

Waxaa laga yaabaa inaan dhexdhexaadintu aysan ahayn mid ku haboon haddii ay jirto taariikhda qalalaasaha qoysku.

Qalalaasaha Qoyska

Waa maxay qalalaasaha qoyska?[1]

Qalalaasaha qoyska waa qalalaase jireed oo kasta ama waxyeelo dareen maskaxeed oo u dhaxeysa xubnaha qoyska. Waa **nooc kontoroolid ah** oo hal qofi isticmaalo si uu u xukumo oo u kontoroolo xubin qoyska ah.

Qalalaasaha qoysku waa dabeecad :

- jir ahaan waxyeesha
- dhalisa cabsi
- ka ilaalisa qof sameynta waxay rabaan inay sameeyaan
- ka dhigta xubin qoyska ah inay u dhaqanto si aan ahayn doorasho xor ah.[2]

Qalalaasaha qoyska waxaa sidoo kale loo yaqaan qalalaasaha guriga.

Muhiim:

Qalalaasaha qoyska lama ogola Victoria gudaheeda.

[1] Domestic Abuse Intervention Project , "Power and Control Wheel", http://www.theduluthmodel.org/training/wheels.html.

[2] Jones, A. & Schechter, S. (1992). When Love Goes Wrong. Melbourne: HarperCollins

Yuu saameyey qalalaasaha qoysku?

dhibanaha/ka samata baxu waa qof uu dhaawacay qalalaasha qoysku. Waxaa sidoo kale loogu yeeri karaa:

Xubinta qoyska ah ee wax soo gaareen	Ereygan waxaa badanaa isticmaala maxkamada iyo booliiska.
Qofka la ilaaliyey	Ereygan waxaa loo isticmaalaa marka amarka kala dhexgalku uu ilaalinayo dhibanaha/ka samata baxahu.

Dadka isticmaala qalalaasaha qoyska waxaa badanaa loogu yeeraa ‘dembiilayaal’. Waxaa sidoo kale loogu yeeri karaa ‘dacweysane’ haddii ay iyaga ka heystaan amarka kala dhexgalka ah.

Xubin kasta oo qoyska ah waxay noqon kartaa dhibane/ka samata baxaha qalalaasaha qoyska. Xubin kasta oo qoyska ah way keeni kartaa qalalaasaha qosyka.

Qalalaasaha qoysku wuxuu noqon karaa mid ah qalalaasha qoyska isudhow, tusaale ka u dhaxeeya nin iyo xaaskii.

Wuxuu sidoo kale noqon karaa xiriirada kale ee qoyska, sida wiilka la dhalay oo adeegsanaya qalalaase ku aadan hooyadii, ama gabadha ayeeyada loo yahay oo isticmaalaysa qalalaase ku aadan awoowgeed.

Xaaladaha badidooda Australia gudaheeda, dembiilayaasha qalalaasaha qoysku waa rag dhibanayaasha/ka samata baxayaashuna waa duwan iyo carruur.

Falalkee baa ah qalalaase qoys?

Sida waafaqsan Xeerka Ilaalinta Qalalaasaha Qoyska ee (2008), dabeecadaha soo socda ayaa loo arkaa inay yihiin qalalaasaha qoyska marka qof u isticmaalo xubin qoyska ah:

Nooca qalalaasaha	**Tusaalayaasha :**
Waxyeelo jireed	• wax ku dhufasho • feerid • riixid • ku candhuufid • timaha jiidid • nooc kasta oo kale oo ah qalalaasha jireed ee u keena dhib ama cabsi qof kale
Waxyeelada galmo	• kufsi • weerar galmo • weerar galmo carruureed • wixii shumin kale oo aan la rabin ah, taabasho ama dabeecad galmo
Waxyeelo nafsadeed ama dareen maskaxeed	• magac ugu yeerida dhibanaha/ ka samata baxaha

- u hanjabaad
- ka dhigida dhibanaha/ ka samata baxaha inay u maleeyaan inay waalan yihiin
- ceebeynta dhibanaha / ka samata baxaha
- ka dhigida dhibanaha/ka samata baxaha inay wax xun ka dareemaan nafsadooda
- wixii dabeecad ah ee kale oo dhibta, cabsi gelisa ama welwelisa

Waxyeelo dhaqaale

- kontoroolida dhammaan lacagta
- xadidida dhibanaha/ka samata baxaha helidiisa lacagta, ama ka dhigida dhibanaha /ka samata baxaha inay lacag ku weydiistaan
- ka hor istaagida dhibanaha/ka samata baxaha helida ama heysashada shaqo

- ku khasbida dhibanaha/ ka samata baxaha shaqo aysan rabin inay sameeyaan ama sharci daro ah

Muhiim

Haddii waxyeeladu tahay luuqad aan Ingiriis ahayn, weli waa waxyeelo nafsadeed.

Hanjabaada	• ku hanjebida ka tegida xubin qoyska ah • ku hangebida in la dhaawaco ama dilo qof, dhibanaha/ka samata baxaha ama carruurtooda • ku hanjebida qaadashada carruurta • keenida, ama ku hanjebida inuu keeno , dhimashada xayawaan
Ku khasbida	• ku khasbida dhibane/ka samata baxe inuu u dhaqmo si

- ku khasbida dhibane/ka samata baxaha inuu sameeyo wax aysan haddii kale sameeyeen

Ama wixii ficil ah ee kale ee kontoroola ama xoog u sheegta dhibane/ka samata baxaha oo ka dhiga inay u *cabsoodaan* nafsadooda ama fiyoobaanta nafsadooda ama qof kale.

Sidoo kale waa qalalaasaha qoyska haddii dabeecada kore, ama saameynta dabeecada kore uu maqlo ama arko ilme.

Ka markhaati ka noqoshada qalalaasaha qoyska wuxuu noqon karaa mid dhib badan u leh carruurta oo sababi kara arimo maskaxeed wakhti dheer. Fadlan ee **Ka waran carruurteyda**? Wixii macluumaad dheeraad ah.

Qalalaasaha qoyska iyo wakiilnimada/fiisaha sayga

Haddii qof ku yimid Australia fiisaha sayga, weli waxay xaq u leeyihiin inay ku noolaadaan xiriir ammaan ah, waxayna la xiriiri karaan booliiska haddii ay dareemaan ammaan daro ama in la waxyeeleeyo.

Haddii qof uu ka welwelsan yahay wax ku saabsan xaalada degaanka iyo oo doonaya inuu ogaado waxa dhici doona haddii ay soo sheegaan qalalaaso, waa inay la xiriiraan Victoria Legal Aid. Waxaa laa yaabaa inay jiraan fursado si loo caawiyo oo ay ku joogaan Australia xitaa haddii ay ka tagaan xiriirka guurka.

Su'aal

S: Muxuu qofi sameeyaa haddii ay ka welwelsan yihiin fiisahooda?

J: Qofku waa inuu la xiriiraa Victoria Legal Aid si uu u ogaado macluumaad intaa ka badan.

Booliiska

Dhacdooyinka qalalaasaha qoyska waxaa u sheegi kara booliiska cidkasta oo aragta ama maqasha qalalaasaha qoyska oo dhacaya.

Tan waxaa ku jira dhibanaha/ka samata baxaha, ama deriska.

Haddii dhacdada qalalaasaha qoysku loo sheego booliiska, booliisku wuxuu awoodaa:

- inuu yimaado qofka gurigiisa ama meel kale, sida dugsiga.
- inuu soo galo guriga oo uu baaro wixii dhacay, oo ay ka mid yihiin qaadashada sawiro caddeyn ah
- inuu xiro dembiilaha, ama dhigo dembiilaha inuu guriga ka tago haddii ay u maleynayaan in sidani tahay sida ugu fiican ee lagu hubinayo in qof kastaa ammaan yahay.
- inuu dacwad ku oogo dembiilaha
- inuu qaato ogeysiiska ammaanka qalalaasaha qoyska si looga joojiyo dembiilaha inuu isticmaalo qalalaase, waxyeelo, kontorool ama u dhowaanshaha qoyskooda.

Booliisku wuxuu qaadi karaa tallaabo xitaa haddii dhibanuhu/ka samata baxahu aysan rabin inay sameeyaan.

Su'aal

S: Maxaan sameeyaa haddii sarkaal booliis ahi iyiraahdo ka tag gurigeyga?

J: Haddii sarkaalka booliisku ku yiraahdo ka tag guriga waa muhiim inaad isdejiso oo aad weydiisaa wakhtiga iyo goobta aad maxkamad u tegayso, oo la xiriir xarunta sharciga bulshada ama Victoria Legal Aid wixii tallo ah. Booliisku waxay u qaataan warbixinta qalalaasaha qoyska si aad u daran.

Amarada Qalalaasaha Qoyska

Waa maxay 'Amarku?'

'Amarada' waxaa loo bixiyaa si loo joojiyo qalalaasaha qoyska. Waxaa jira noocyo kala duwan oo 'amaro ah':

Ogeysiiska ammaanka qalalaasaha qoyska

Haddii booliisku ay rumeysan yihiin inuu dhacayo qalalaasaha qoysku, waxay bixin karaan ogeysiiska ammaanka si ay u ilaaliyaan dhibanaha/samata baxaha. Booliiska ayaa geynaya (siinaya) ogyesiiska ammaanka qalalaasaha qoyska dembiilaha.

Ogeysiiska ammaanka ah wuxuu ku egyahay ilaa shan maalmood oo shaqo, ama ilaa arinta lagu dhageysanayo maxkamad. Ogeysiisku wuxuu saaraa shuruudo dabeecada dembiilaha, una eg inay noqdaan isla shuruudaha ku yaala ammarka kala dhexgalka. Tusaale, waxaa laga yaabaa inuu yiraahdo dembiiluhu ma joogi karo guriga.

Ogeysiiskan wuxuu shaqeynayaa ilaa inta maxkamad la geynayo. Maxkamada ayaa go'aamin doonta haddii amarka kala dhexgalku inuu sii jirayo in kale.

Ammarka kala dhexgalka ku meel gaarka ah

Waxaa laga yaabaa inay maxkamadu sameyso amar kala dhexgal oo ku meel gaar ah ilaa intay ka go'aamineyso inay sameyo amarka kala dhexgal ee ugu dambeeyey. Ammarka ku meelgaarka ah waa amar sharci ah wuxuuna ka hortegayaa inuu dembiiluhu sameeyo waxyaalaha qaarkood.

Amarka ku meel gaarka ah taariikh buu yeelanayaa wuuna liisgareynayaa xiriir noocee ah ayaa loo ogol yahay inuu ka dhaxeeyo dembiilaha iyo dhibanaha/ka samata baxaha.

Amarkan waxaa dalbay booliiska ama dhibanaha/ka samata baxaha, ka dibna waxaa xaqiijiyey garsooraha.

Ammarka kala dhexgalka

Amarka kala dhexgalka waa amar sharci ah oo uu gaadhay garsooruhu. Ammarka kala dhexgalka waxaa dalban kara midkood booliiska ama dhibanaha/ ka samata baxaha.

Amarka kala dhexgalka wuxuu ka hortagaa dembiiluhu inuusan sameyn waxyaalaha qaarkood.

Ammarka kala dhexgalka waxaa loo sameeyey inuu ku haboonaado baahida qoyskaa qaarka ah iyo xaaladaa, laalkiinse amarkuna kala dhexgalka wuxuu leeyahay in dembiiluhu:

- waa inuusan gelin qalalaasaha qoyska
- waa inuusan si ula kac ah u waxyeelayn hantida ama ku hanjebin inuu waxyeeleeyo hantida;
- waa inuusan iskudeyin inuu raadiyo, dabagalo, ama uu dusha ka ilaaliyo qofka la ilaaliyey (dhibanaha/ka samata baxaha);
- waa inuusan interneetka wax ku daabacin, isagoo adeegsanaya iimeyl ama xiriirada kale ee elektarooniga ah oo ku saabsan qofka la ilaalinayo;

- waa inuusan ku soo dhowaan ama uusan u jirsan ilaa [X] mitir qofka la ilaaliyey
- waa inuusan aadin ama u jirsan [X] mitir [cinwaanka] ama meel alaale meeshii kale ee qofka la ilaalinayo uu ka shaqeeyo, degan yahay ama dugsi ka dhigto, kindho ama xannaanada carruurta
- waa inuusan qof kale usoo adeegsan inuu u sameeyo wax kasta oo loo diidan yahay qofka dembiilaha ah sameyntooda sida waafaqsan amarka

Tusaale: Haddii uu ammarku leeyahay in dembiiluhu wici Karin dhibanaha/ka samata baxaha, ma weydiin karaan qof kale inuu u sameeyo.

Muhiim:
Tusaalayaashan waa qaar uun ka mid ah waxyaalo guud oo badan oo ku qoran ammarka kala dhexgalka. Waxyaalo badan ayaa lagu dari karaa ama wax laga bedeli karaa iyadoo ku xiran xaalada iyo baahida dadka ku lugta leh.

Jebinta ammarka kala dhexgalka

Waxaa loogu yeeraa jebinta amarka kala dhexgalka haddii dembiiluhu uu sameeyo wax uu amarka kala dhexgalku uu leeyahay ma sameyn karaan.

Jebinta amarka kala dhexgalka waa arin fal dembiyeed khatar ah.

Maxkamadu waxay ku ciqaabi kartaa qofka jebiya ammarka kala dhexgalka ilaa iyo shan sanno oo xabsi ah, ama ganaax dhan ilaa $24,000.

Jebinta ammarka kala dhexgalka wuxuu horseedi karaa diiwaan dembiyeed.

Waa jebinta ammarka kala dhexgalka haddii dhibanuhu/ ka samata baxahu uu weydiiyo dembiilaha inuu sameeyo wuxuu ammarku ku leeyahay dembiiluhu ma sameyn karo.

Aad bay muhiim u tahay in qofkasta uu saameyey ammarku inuu fahmo waxa ammarku leeyahay.

Haddii uu jiro waxaan caddeyn, waa muhiim inaad raadsato talo sharciyeed oo laguu sharxo dhammaan faahfaahinta.

Xarumaha sharciga bulshada waxay la xiriiri karaan turjumaano ka caawiya inay sharxaan ammarada.

Tusaale

Waxaa jira ammarka kala dhexgalka ee laga qaatay Jonathan ee ilaalinaya xaaskiisa Maria. Ammarka kala dhexgalka wuxuu ku leeyahay Johnathan ma tegi kartid guriga qoyskiisa.

Maalin Maria ayaa jiratay waxayna u baahatay in la xannaaneeyo saddexdeeda carruura saa daraadeed waxay wacday Jonathan waxayna weydiisay inuu yimaado guriga. Jonathan wuxuu gaariga u soo kaxeystay guriga si uu uga caawiyo inuu casho u kariyo carruurtana seexiyo.

deriskooda, Angela, waxay ogtahay ammarka kala dhexgalka, markay aragtay Johnathan oo yimidna , waxay wacday booliiska. Booliisku wuxuu qabtay Jonathan wuxuuna aaday maxkamad.

Maria dacwad laguma oogi doono maadaama ammarka kala dhexgalka uusan wax xanibaad ah saareynin iyada. Jonathan waa inuu hubiyaa inuusan sameyn waxyaalaha uu ammarku leeyahay ma sameyn kartid.

Ka waran carruurteyda?

Yaa ilmo ah?

Sida waafaqsan Xeerka Ilaalinta Qalalaasaha Qoyska, ilmuhu waa qofka ka yar 18 sanno.

Xaggee bay carruurtu ku noolaan karaan kala maqnaanta ama furiinka ka dib?

Australia gudaheeda, labada waalidba waxay weydiisan karaan inay wakhti la qaataan carruurtooda.

Waxaa la rumeysan yahay in meesha ugu fiican ee carruurta waa meeshay ammaan ku helayaan oo lagu ilaalinayo.

Waxaa la rumeysan yahay in la helo, in ilmo kastaa ka helo jaceyl iyo xannaano labadooda waalidba haddii taasi suurtogal tahay.

Haddii carruurtu khatar ku jiraan, ama aysan ka dareemaynin ammaan hal waalid, waalidka kale ayaa qaadan kara xannaanada carruurta oo dhan.

Muhiim:
Dalalka qaarkood, marka lammaane uu kala tago ama isfuro, aabaha ayaa badanaa hela xannaanada carruurta oo dhan. Arintu sidaan ma ahan Australia. Kiis kasta waxaa loo qiimeeyaa si shakhsi ah.

Yaa go'aaminaya meesha carruurtu ay ku noolaanayaan ka dib kala maqnaanta ama furiinka?

Labada waalid midkood ama Maxkamadaha Sharciga Qoyska ayaa go'aaminaya meeshay carruurtu ku noolanayaan.

Haddii aysan jirin wax isafgaranwaa ah, carruurtuna ay faraxsan yihiin oo ammaan yihiin waalidiintu waxay isku raaci karaan carruurtu qofkay la noolaanayaan iyo markay waalidka kale wakhti la qaadanayaan waxaana laga yaabaa inaysan maxkamaduhu ku lug yeelanaynin.

Waalidiinta waxay aadi karaan dhexdhexaadin si ay uga caawiso go'aaminta arimahan meeshii ay ka aadi lahaayeen maxkamad.

Tusaale:

Yasmin iyo Michael waxay go'aansadeen inay kala tagaan sababtoo ah islama jaanqaadi karaan. Waxay leeyihiin laba carruura oo yar yar oo ay labadooduba jecel yihiin xannaaneeyaana.

Xiriirkooduna ma lahayn wax qalalaase ah.

Yasmin iyo Michael waxay ka wada hadleen sida ugu wanaagsan ee ay carruura u xannaaneeynayaan waxayna isku raaceen inay carruurtu la noolaadaan Yasmin Isniinta ilaa Jimcaha, iyo inay la noolaadaan Michael Sabti iyo Axad kasta.

Yasmin iyo Michael uma baahna inay booliiska soo geliyaan, dhexdhexaadin ama maxkamado inay sameeyaan go'aankan.

Haddii uu jiray isafgaranwaa, qalalaase, ama haddii waalidku uusan isku raaci karin meesha carruurtu ay ku noolaan doonaan ka dib marka xiriirku uu burburo, maxkamada ayaa laga yaabaa inay ku lug yeelato oo ay go'aamiso meesha ugu fiican ee ay carruurtu ku noolaanayaan.

Haddii uu jiro isafgaranwaa ama qalalaase, waxaa laga yaabaa inay maxkamadu go'aamiso inay hal waalid noqdo ka ugu muhiimsan ee carruurta xannaaneynaya ka dibna dejinaya shuruudo ku saabsan sida iyo wakhtiga waalidka kale uu ku arki karo ama kula xiriiri karo carruurta.

Tusaale

Maria iyo Jonathan waxay go'aansadeen inay ka tagaan. Jonathan wuxuu hore u ahaa mid qalalaase leh hore waxaa u jiray amarka kala dhexgalka oo leh qalalaase ma sameyn karo ama ma tegi karo guriga qoyska.

Tan ka sokow, Jonathan wuxuu rabaa in carruurtu ay la noolaadaan isaga hal toddobaad toddobaadka kalena Maria. Maria waxay rabtaa carruurtu inay la noolaadaan wakhtiga oo dhan.

Maria iyo Jonathan iskuma raaci karaan waxa u fiican, saa daraadeed maxkamada ayaa qiimeysay xaalada oo ku salaysan dhammaan xaaladaha.

Maxkamadu waxay go'aamineysaa inay carruurtu la joogaan Maria wakhtiga badidiisa, Johnathan wuxuu arki doonaa labadii toddobaadba laba maalmood.

Carruurta waxaa loo arkaa inay yihiin dhibane/ka samata baxaha qalalaasaha qoyska haddii ay arkaan qalalaasaha qoyska, ama loo muujiyo

saameynta qalalaasaha qoyska, xitaa haddii aan qalalaasaha iyaga loola jeedin. Tani waxay sidaan u tahay sababtoo ah carruurtu waxay yeelanayaan arimaha caafimaadka maskaxda , jireed iyo mid nafsadeedba wakhtiga gaaban, dhexdhexaad ah iyo ka wakhtiga dheerba. Waxay saameyn kartaa noloshooda oo dhan.

Waa mudnaanta booliiska, maxkamadaha, iyo sharciga in la hubiyo in carruurtu ay had iyo jeer ammaan yihiin oo laga ilaaliyo dhibaatada. Taasi waa sababta loogu tixgeliyo qalalaase qoys haddii ilmuhu uu maqlo ama arko qalalaase ka dhacaya qoyska dhexdiisa, xitaa haddii aan qalalaasha iyaga loola jeedin.

Aad ayey muhiim u tahay inaad ka raadsato tallo sharci xarunta sharciga bulshada, Victorian Legal Aid ama aad kala xiriirto xarunta Xiriirada Qoyska wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan waalidnimada inta lagu jiro xiriirka burburay, gaar ahaan haddii uu jiray qalalaase ama isafgaranwaa.

Muhiim

Haddii aadan hubin in laguu ogol yahay inaad aragto ama la hadasho carruurtaada sababtuna tahay amarka kala dhexgalka ama amar kale , waxaad ka raadsan kartaa tallo sharci oo bilaash ah xarunta sharciga bulshada ama Victoria Legal Aid.

Xiriirada caawimaada badan

Maxkamadaha Qoyska

Federal Circuit Court of Australia

305 William Street, Melbourne Vic. 3000

W: www.federalcircuitcourt.gov.au

E: enquiries@familylawcourts.gov.au

Ph: 1300 352 000

Maxkamada Qoyska Australia

305 William Street, Melbourne Vic. 3000

W: www.familycourt.gov.au

E: enquiries@familylawcourts.gov.au

Ph: 1300 352 000

Dhexdhexaadinta

Xarunta Xiriirka Qoyska Magaalada Melbourne

Dabaqa Hoose ee Dhulka (ka soo gal Waddada Queen)

379 Collins Street, Melbourne Vic. 3000

W: www.relationshipsvictoria.com.au

E: enquiries@melbournefrc.org.au

Ph: 8625 3666

Xiriirada dadka isticmaala qalalaasaha qoyska

Xaalada degdega ah, had jeer ka wac booliiska 000

Adeegga Ugudbinta Ragga:

Wuxuu bixiyaa la tallinta taleefanka ah, u gudbinta iyo macluumaad siinta.

Ph: 1300 766 491

W: www.ntvmrs.org.au

Caawimaada sharciga

- Talo sharci oo bilaash ah kuna saabsan qalalaasaha qoyska ama sharciga qoyska
- Metelaada kharashka yar ama Bilaashka ah
- Caawimaada si loo fahmo amarka kala dhexgalka

Adeegga Sharciga ee Fitzroy

Level 4, Fitzroy Town Hall,

Ka soo gal wadiiqada ku xigta 126 Moor Street Fitzroy, VIC 3065

Ph: 9419 3744

E: enquiries@fitzroy-legal.org.au

W: www.fitzroy-legal.org.au

Victoria Legal Aid

570 Bourke Street, Melbourne Vic. 3000

Ph. 1300 792 387

W: www.legalaid.vic.gov.au

Raadi Xarunta Sharciga Bulshada ee kuu dhow:

www.fclc.org.au/find_a_clc.php

Xiriirada dhibanaha/ ka samata baxaha

Xaalada degdega ah, had jeer ka wac booliiska 000

Caawimaada sharciga

- Talo sharci oo bilaash ah kuna saabsan qalalaasaha qoyska ama sharciga qoyska
- Metelaada kharashka yar ama Bilaashka ah
- Caawimaada si loo fahmo amarka kala dhexgalka

Adeegga Sharciga ee Fitzroy

Level 4, Fitzroy Town Hall,

Ka soo gal wadiiqada ku xigta 126 Moor Street Fitzroy, VIC 3065

Ph: 9419 3744

E: enquiries@fitzroy-legal.org.au

W: www.fitzroy-legal.org.au

Victoria Legal Aid

570 Bourke Street, Melbourne Vic. 3000

Ph: 1300 792 387

W: www.legalaid.vic.gov.au

Raadi Xarunta Sharciga Bulshada ee koo dhow:

www.fclc.org.au/find_a_clc.php

Si aad u dalbato amarka kala dhexgalka

Haddii aad degan tahay City of Yarra, waxaad ka dalban kartaa amarka kala dhexgalka:

Online

www.familyviolence.courts.vic.gov.au/online-form

Xarunta Caddaalada Derisnimada Maxkamada Koowaad

241 Wellington Street,

Collingwood Vic. 3066

Ph: 9948 8777

Saldhiga booliiska xaafadaada

Fitzroy Police Station

13 Condell Street,

Fitzroy Vic. 3069

Ph: 9934 6400

Collingwood Police Station

1 Eddy Court,

Collingwood Vic. 3067

Ph: 8413 1700

Richmond Police Station

217 Church Street,

Richmond Vic. 3121

Ph: 8420 3600